

Ardayga dugsi-horaadka ee sharafta lahow

Deyrta soo socota waxaa billaabanaya dugsi-horaadkaada. Waxbarasho-horaadka inta aad ku jirto waxaad ciyaar, baaritaan iyo farshaxan ku baraneysaa wax cusub. Saaxiibo cusub ayaad ku baraneysaa dugsi-horaadka waxaadna sidoo kale soo soo fiirin doontaa waxa dugsiga ka dhacaya.

Waxaad waalidkaa la soo fiirin kartaa waxyaabaha ka dhaca dugsi-horaadka. Janalka Youtubka ee waxqabadka barbaarinta iyo waxbarashada waxaa laga helaa [fiidiyowyo](#) ka hadlaya filashooyinka iyo rajooyinka ay ardayda dugsi-horaadka ee xannaano-maalmeedka Eira ay ka qabaan sanadka dugsi-horaadka iyo waxyaabaha ay fikrad ahaan qabaan in ay ugu fiican yihiin marka lagu jiro dugsiga-horaadka.

Ku soo dhowow dugsi-horaadka!

Ku soo dhowow waxbarasho-horaadka!



Macluumaad loogu talagalay mas'uuliyiinta

Waxbarasho-horaadku waa waxbaris iyo barbaarin hiigsi leh islamarkaasna qorsheysan, taas oo ay ciyaari ku dheehan tahay. Hiigsigu waa in la horumariyo lana kaalmeeyo waxyaabaha loogu baahan yahay waxbarashada iyo barbaarinta ee cunugga iyo sare u qaadista u wareegista dugsiga oo dabiici ah.

Waxbarasho-horaadka ku baxda afka Finnishka waxaa lagu qaban-qaabiyaa magaalada Helsinki xannaano-maalmeedyada degmada iyo kuwa gaarka loo leeyahay. Waxbarasho-horaadku waa lacag la'aan waxaana inta badan la bixiyaa afar saacadood maalinti inta lagu jiro waqtiyada ay dugsiyadu shaqeeyaan. **Waxbarasho-horaadka sanad-dugsiyeedka 2019–2020 waxey billaabaneysaa 8.8.2019 waxeyna dhamaaneysaa 29.5.2020.**

Cunug kasta waa in uu ka qeybqaataa waxbarasho-horaadka sanad ka hor billaabashada waajibka waxbarasho. Mas'uuliyadda ka qeyb-qaadashada cunuggu waxey saaran tahay waalidka. Waxbarasho-horaadka waxaa la codsanayaa waqtiga u dhexeeya 7.–23.1.2019. **Arrimo-fulinta elekterikaalka ah ee Helsinki aya codsiga laga sameynayaa.** Haddii loo baahdo xannaano-maalmeedyada waxaa laga helayaa foom warqad ah oo xannaano-maalmeedka lagu soo celinayo 23.1.2019. Waxbarasho-horaadka xannaan-omaalmeedka gaarka loo leeyahay toos aya loo codsanayaa.

Booska waxbarasho-horaadka waxaa ugu horeyn qaab ku saleysan deegaankiisa cunugga looga siinayaa soonaha qaadashada ardayga. Macluumaadka ku saabsan booska waxbarasho-horaadka ee cunuggiina waxaan idiin soo direynaa todobaadka 11aad.

- ▶ **Macluumaad dheeraad ah iyo codsashada waxey ku jiraan cinwaanka:** hel.fi/esiopetus
- ▶ **Information about pre-primary education:** hel.fi/preschool